

GUUDMARKA QIIMEYNTA



Si aad u hesho dheefahaaga sanduuqa WA Cares Fund, waxaad u baahan doontaa in aad buuxiso shuruudaha wax-ku-biirinta iyo shuruudaha baahiyaha daryeelka. Warqadaada go'aaminta wax-ku-biirinta ayaa kuu sheegi doonta haddii aad ka soo baxday shuruudaha wax-ku-biirinta iyo xaddiga dheefta ee aad heli karto. Shuruudaha baahiyaha daryeelka ayaa la xaqiijiyaa iyadoo la adeegsanayo qiimeynta baahiyaha daryeelka.

Inta lagu guda jiro qiimeynta baahiyaha daryeelka, waxaan kaaga la hadli doonnaa caawimaadda aad ugu baahan karto hawlaha maalinlaha iyo haddii baahidaasi la filayo in ay sii socoto ugu yaraan 90 maalmood.

Waxqabadyada aynu qiimeyno



Qubeys



Dhaqdhaqaaqa sariirta



Wax Cunista



Maareynta daawooyinka



Dhaqdhaqaaqa



U-kala-wareejin



Adeegsiga musqusha

Haddii aad ka soo baxdo labada shuruudood, waxaad u baahan kartaa in lagu ansixiyo isticmaalka dheefaha WA Cares.

MACLUUMAADKA JADWALEYNTA

Waxaad isticmaali doontaa akoonkaaga dheefaha si aad u jadwaleyso wacitaanka xubin ka tirsan kooxda WA Cares oo aad u bilowdo hannaanka qiimeynta. Haddii aadan awoodin jadwaleynta loo marayo akoonkaaga dheefaha, naga la soo xiriir telefoonka ama email.

Inta lagu guda jiro wacitaanka telefoonka, waxaan wax ka weyddiin doonnaa baahiyahaaga daryeelka waxaanna diyaarin doonnaa ballantaada qiimeynta. Waxaan bixin kartaa caawimaad luuqadeed iyo adeegyo gaarid inta lagu guda jiro qiimeyntaada. Tusaale ahaan, waxaan hubsan karnaa in ballantu ay ka dhacdo goob haqabtirto baahiyahaaga dhaqdhaqaaqa ama hagaajinta jadwaleynta si loo oggolaado waqti dheeraad ah. Baahiyahaaga waqti hore aan oggaano.

Waxaa sidoo kale lagugu soo dhaweynayaa in uu ugu yaraan hal qof oo taageero ah uu joogo goobta inta lagu guda jiro qiimeyntaada. Qofkan taageerada ah wuxuu bixin karaa kalsooni wuxuunna gacan ka geysan karaa xaqiijinta in qiimeeyuhu fahmo baahiyahaaga iyo dookhyadaada.

QIIMEYNTA QOF AHAANEED

Qiimeyn fool ka fool ah ayaa ka dhici karta gurigaaga ama xafiiska Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka. Waxaa fulin doona xubin ka tirsan kooxda WA Cares ee DSHS ama shaqaale ka socda hay'adda deegaankaaga ee daryeella Dadka Waayeelka ah. Qiimeynta baahiyaha daryeelka waxay qaadan kartaa 90 daqiiqo ama in ka badan si loo dhammeeyo.

SIDA LOO DIYAARIYO

Si aad gacan uga geysato in hannaanku u socdo si habsami leh, waxaa laga yaabaa in aad dooneyso in aad diyaarsato macluumaadkan soo socda.

AGABKAN LOOMA BAAHNA, LAAKIIN WAXAA AY NOQON KARAAN KUWO CAAWIMAAD LEH:

- Liiska baaritaannadaada hadda, xaaladaha iyo jirrooyinka
- Liiska daawooyinkaaga iyo daaweyntaada (si aan u fahanno baahida aad u qabto in lagaa caawiyo maareynta daawooyinka, waxaan ku weyddiin doonnaa tirada daawooyinka aad qaadato waxaanna diiwaangelin doonnaa daawooyinka gaarka ah ee aad qaadato)
- Macluumaadka ku saabsan adeegyo daryeel muddo dheer kasta ee aad hadda isticmaalayso ama aad isticmaashay bishii la soo dhaafay
- Qorshaha daryeelka hadda, haddii la heli karo

Haddii aysan diyaar kuu ahayn macluumaadkaan oo dhan, xubinta kooxda WA Cares ama shaqaalaha ka socda Hay'adaada Goboobidda ee Degaankaaga ayaa kugu hagi doonna hannaanka oo dhan.

WAX BADAN KA OGOW



Taleefoonka
844-CARE4WA
(844-227-3492)



Email ama wada-sheekaysi
wacaresfund.wa.gov/contact

Caawimaad luuqadeed ayaa la heli karaa.

Si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyay, booqo wacaresfund.wa.gov.